IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 5aad | *Muqdisho, 27 Jan. 1977, L. 2R1*

Laanta Faafin Rasmiga ah ee ka tirsan Madaxtooyada J.D.S.

**FAAFIN BIL SOO BAXA** جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

K O O B N I I N

## BOGGA KOOWAAD

W. M.

---

## BOGGA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA G.S.K. ee 30 Juun 1976, *Billad Maar ah hawlkarnimo lagu maamuusay jaalle Xaashi Abiib Tubeec L. 11* ... Bogga 67

XEER MADAXWEYNAHA G.S.K. ee 30 Juun 1976, *Gunnada Garsoorayaasha Maxkamadda B.D. L. 12* ... » 68

XEER MADAXWEYNAHA J.DS. ee 6 Setember 1976, *Billad Maar ah hawlkarnimo lagu bixiyey Sannadguurada Joogteynta Ololaha Horumarinta Reer Miyiga L. 13* ... » 70

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 1 Nof. 1976, *Jaalle Cabdirashiid Aadan Xirsi oo lagu wareejiyey Ciidanka Booliska Soomaaliyeed L. 14* ... » 71

**WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA**

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 4 Jannaayo 1977, Dallacaad Saraakiil ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed *L. 15* » 72

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 13 Jannaayo 1977, *Shaqo ka fariisasho Jaalle G/le Maxamed Maxamuud Samantar L. 16* » 74

## BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 10 Jan. *1977, Naada Dhul Jaalle Maxamed Saciid Samantar L. 24* » 75

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 10 Jan. *1977, Naada Dhul Jaalle Cusmaan Jimcaale Maxamuud L. 25* » 76

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 10 Jan. *1977, Naada Dhul Jaalle Macallim Abuukar Aw Xasan L. 26* » 77

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 10 Jan. *1977, Jaalle Xasan Maxamuud Khaliif L. 27 L. 27* » 78

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 10 Jan. *1977, Naada Dhul Jaalle Aadan Cali Xasan L. 28* » 79

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 10 Jan. *1977, Naada Dhul Jaalle Muuse Faarax Xasan L. 29* » 80

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 10 Jan. *1977, Naada Dhul Jaalle Cabdirisaaq Axmed Jaamac L. 30* » 81

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 10 Jan. *1977, Naada Dhul Jaalle Cabdiweli Sheekh Barkhale L. 31* » 82

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 10 Jan. *1977, Naada Dhul Jaalle Colaad Cali Barre iyo Xaliima Caddow Maxamed L. 32* » 83

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 10 Jan. *1977, Naada Dhul Jaalle Jaamac Cabdi Cali L. 33* » 84

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 10 Jan. *1977, Naada Dhul Jaalle Cabdullaahi Maxamed Sacdi L. 34* » 85



WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 10 Jan. *1977, Naada Dhul Jaalle Xuseen Nuur Muudey L. 35* » 86

WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 10 Jan. *1977, Naada Dhul Jaalle Maxamed Saciid Samantar L. 36* » 87

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA EE 26.12.1976, *Heerka Sarrifka lacagaha Qalaad L. 37* » 88

BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA EE 26.12.1976, *Heerka Sarrifka lacagaha Qalaad L. 38* » 89

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER 29.11.76, *Lumid jeegga wareega Lam. 101612 ku qoran Sh. SO. 940 uu leeyahay Xasan Cabdulle Macallin L. 39* » 90

# BOGGA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 30 Juun. 1976, Billad Maar ah Hawlkarnimo lagu maamuusay Jaalle Xaashi Abiib Tubeec. L. 11

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

MARKUU ARKAY: Warqadda 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 1 ee 21kii Oktoobar 1969;

MARUU ARKAY: Sharciga Lam. 65, soona baxay 19kii Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: Kartida hufnaanta, Waddaninimada iyo Kacaannimada uu Jaalle Xaashi Abiib Tubeec ku gutay waajibaadkiisa muddadii dheerayd ee uu ahaa Madaxa Xoghaynta Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha;

MARKUU ARKAY: Inay tahay lagama maarmaan in hawsha qaayaha iyo qiimaha leh ee uu Jaallahaasi u qabtay Ummaddiisa loogu abaalgudo, loogana reebo xusuus dhaxal-gal taariikheed leh;

MARKUU DHGEYSTAY: Ra'yiga Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha (fadhigii labada Gole ee 10ka Febraayo 1976).

WUXUU GUDDOOMIYEY

XEERKA SOO SOCDA

Qodob keliya

Waxaa lagu maamuusay Jaalle Xaashi Abiib Tubeec, oo horay u ahaan jirey Madaxa Xoghaynta Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayaasha, Billad Maar ah ee Hawlkarnimo.

Muqdisho, 30.6.1976,

GUDDONSHAHA GOLAHA S. KACAANKA
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*



XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 30 Juun. 1976, Gunnada Garsoorayaasha Maxkamadda Badbaadada Dalka L. 12

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

MARKUU ARKAY : Xaashida 1aad iyo an 2aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY : Sharciga L.1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY : Sharciga L.3, soona baxay 10kii Janaayo 1970, laguna dhisay M.B.D.;

MARKUU ARKAY : Dekreetada L.174 ee 29.7.1970, kuna saabsan gunnada Lataliyayaasha MBD;

MARKUU ARKAY : Dekreetada Laam.66 ee 1dii Febraayo 1973;

MARKUU ARKAY: Dekreetada lam. 59 oo ku taariikhaysan 10.6.-1973, kuna saabsan gunnooyinka Garsoorayaasha iyo Wakiillada Xeer Ilaaliyaha ee MBD Gobllada;

MARKUU ARKAY : Baahida loo qabo habeynta gunnooyinka Garyaqaannada la shaqeeya M.B.D.;

WUXUU GUDDOOMIYEY

Qodobka 1aad

Guddoomiye Kuxigeenka Maxkamadda Badbaadada Dalka wuxuu leeyahay gunno gaar ahaaneed oo ah Sh. SO. 1,100 kun iyo boqol bishiiba.

Qodobka 2aad

Garsooraha ama Xeer Ilaaliye ku Xigeenka ka tirsan Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta oo sida joogtada ah loogu magacaabay in ay la shaqeeyaan M.B.D. Xamar, waxay Wasaaraddooda ku leeyihiin inta ay hayaan hawsha Maxkamadda Badbaadada, Gunno aqal oo ah Sh. SO. 300 (saddex boqol) bishiiba.

Qodobka 3aad

1. Guddoomiyayaasha Maxkamadda Badbaadada Dalka ee laamaha Gobollada oo lagu magacaabay Dekreetada Madaxweynaha GSK, kana tirsan Ciidammada Qalabka sida, waxay leeyihiin gunnada lataliyayaash M.B.D. oo ku xusan Qodobka 1aad. xarafka «C», Xeer lam. 174, soona baxay 29.7.1970.

2. Guddoomiyuhu haddii uu yahay Garsoore ka tirsan Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, wuxuu leeyahay gunno gaar ahaaneed oo ah Sh. SO. 300 (saddex boqol) bishiiba.

Qodobka 4aad

Garsoorayaasha kale ee Maxkamadda Badbaadada Dalka Gobollada, ha ka tirsanaadeen Ciidammada Qalabka Sida ama Wasaaradda Garsoorka, iyo Wakiillada Xeer Ilaaliyaha Guud M.B.D. u jooga Gobollada, waxay leeyihiin gunno gaar ahaaneed oo ah Sh. SO. 300 (saddex boqol) bishiiba.

Qodobka 5aad

Gunnooyinka gaarka ah waxaa laga bixinayaa Miisaaniyadda Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka.

Qodobka 6aad

Waxaa la baabi'iyey Xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin go'aankan.

Qodobka 7aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa laga billaabo 1da Jannaayo 1976.

Muqdisho, 30 Juun, 1976,

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka

*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda

**WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY**

**Diiwaanka lam. 1 bogga lam.**

**Muqdisho, 20 Luulyo 1976,**

**Hantidhorka Guud**

**G/Dhexe Cabdullaahi Nuur**



XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 6 Setember 76, Billad Maar ah Hawlkarnimo lagu bixiyey Sannadguuradii Joogtaynta Ololaha Horumarin Reer Miyiga. L. 13

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka

MARKUU ARKAY: Xaashida 3aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 1 ee 1da Luulyo 1976,

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 56, soona baxay 19kii Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: Sida ammaanta mudan ee Degmooyinka J.D.S. qaar ka mid ah ay u fuliyeen barnaamijka joogteyn Ololaha Horumarinta Reer Miyiga, iyagoo ku gutay xilkaas waddaniga ah niyad Kacaaniimo oo aad u sarraysa, ayna ku dheehan tahay karti, aqoon, qorshe iyo hubin joogta ah, taasoo suurta gelisay in barnaamijka JOHRM uu Degmooyinkaas uga hirgalo sida si ugu habboon ee ka jawaabeysa Siyaasadda Kacaanka dhanka ciribtirka Aqoondarrida iyo sare u qaadidda garaadka Caafimaadka, dhaqanka, dhaqaalaha, Tacliinta iyo labadaraale kaska Siyaasadeed ee Dadweynaha.

MARKUU ARKAY: In ay tahay lagama maarmaan in tartankii loogu jirey hirgelintat barnaamijka JOHRM Xubnihii ku guuleystay sannadkan loo aqoonsado kaalinta wacan ee ay ka qaateen halganka dhismaha aayaha Ummadda Soomaaliyeed, xusuus taariikhi ahna loo lahaado.

WUXUU GUDDOOMIYEY

XEERKA SOO SOCDA

Qodob keliya

Waxaa lagu maamuusay Billad Maar ah ee Hawlkarnimo Degmooyinka hoos ku qoran:

1. — Degmada Gabiley;
2. — » Qoryooley;
3. — » Booraama;
4. — » Diinsoor;
5. — » Laas-caanood;
6. — » Ceel-Afweyne;
7. — » Qacweyne;
8. — » Ceel-Barde;

Muqdisho, 6.9.1976,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 1 Nof. 1976, Jaalle Cabdirashiid Aadan Xirsi oo lagu wareejiyey Ciidanka Booliska Soomaaliyeed. L. 14

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tii labaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lam. yahay 2 ee 23.12.72, dhismaha Ciidanka Booliska;

ISAGOO ARKAY: Xaashida Lam. yahay MJDS/W|3-35 ee 22 Setember 1976, ee Madaxtooyada J.D.S.;

ISAGOO DHGEYSTAY: Taladii uu soo jeediyeyTaliyaha Ciidanka Booliska, kuna soo sheegay warqaddiisa lam. CIID |A/4-105 ee 23.11.76;

ISAGOO TIXGELIYEY: Shaqadiisa wanaagsan u bislaanta dallacaadeed iyo u qalmid;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Taladii uu soo jeediyey Wasiirka Arrimaha Gudaha.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

In marka laga billaabo 1.11.1976, Jaalle Cabdirashiid Aadan Xirsi oo ka tirsan shaqaalaha Dawladda Hoose ee Muqdisho lagu wareejiyey Ciidanka Booliska Soomaaliyeed iyadoo lagu magacaabay Xiddigle, darejadaas oo u dhiganta derejadiisii sibilka ahayd ee shaqaalaha Dawladda Hoose ee Muqdisho.

Shqadiisu waa xiriir sida uu dhigayo qodobka 4aad ee sharciga Lam. 6 ee 31 Disember 1969.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu qori doonaa Faafinta Rasmiga ah Dawladda.

Muqdisho, 1 Nofember 1976.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

Wasiirka Arrimaha Gudaha
Jaalle Sarreeya Gaas Jaamac Maxamed Qaalib

**WAAN ARAGNEY EE DIIWAANGELINAY**
**diiwaanka lam. 1 bogga lam. 167**
**Muqdisho, 17 Jan. 1977,**
**Hantidhawrka Guud**
**G/Sare Cabdullaahi Warsame Nuur**



XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 4 Jan. 77, Dallacaad Saraakiil ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed L. 15

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad tan 3aad ee Kacaan-21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 5aad (lambarka 4aad) ee sharciga ku saabsan dhismaha Ciidanka Booliska lana soo saaray 23kii Disember 1972, lambar 2;

ISAGOO ARKAY: Taladii uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Booliska kuna soo sheegay warqaddiisii lambar XOG|A/8|1 ee 8 Disember 1976, iyo XOG|A/8|1 ee 30 Nofember 1976,

ISAGOO TIXGELIYEY: Shaqadooda wanaagsan iyo u bislaan dallacaad (seniority) iyo u qalmid (merito);

ISAGOO DHEGEYSTAY: Taladii Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha uu soo jeediyey.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

In Saraakiisha hoos ku magacaaban ee ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed la dallacsiiyey lana siiyey darajooyinka nin walba ku hor qoran yahay, marka laga billaabo 1da Jannaayo 1977, kuna hirgalaysa xagga sharciga iyo shaqaalahaba:

1. — Gaashaanle Cismaan Axmed Xuseen «Caanageel» Gaashaanle Dhexe;
2. — Gaashaanle Axmed Cadulle Shucayb Gaashaanle Dhexe
3. — Dhamme Maxamed Cabdi Geelle Gaashaanle
4. — » Maxamed Garruun Maxamed Gaashaanle
5. — » Faarax Xasan Magan Gaashaanle
6. — » Cismaan Nuur Cabdi Gaashaanle
7. — » Maxamuud Xirsi Gaashaanle

Qodibka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 4 Jannaayo 1977.

Wasiirka Arrimaha Gudaha
*S/Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

**WAAN ARAGNAY EE DIIWAAN GELINAY**

**diiwaanka lam. 1 bogga lam 149**

**Muqdisho, 12 Jan. 1977**

**Hantidhawrka Guud**

**G Sare Cabdullaahi Warsame Nuur**



XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 13 Jan. 1977, Shaqo ka fariisasho Jaalle Gaashaanle Maxamed Maxamuud Samantar L. 16

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tii 2aad iyo tii 3aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 19aad xubinta 1aad xarafka (d) ee sharciga lambar 14aad ee 4.1.1973 ee dhismaha Ciidanka Booliska,

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam 6 ee 31.12.1969 kuna saabsan xaqa iyo Abaalgudka Ciidammada Qalabka Sida (Pension and Gratuity);

ISAGOO ARKAY: Taladii uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Booliska;

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshihii Madaxtooyada J.D.S. ee ku qornayd warqadda lam. MJDS WCQS 3-96-2 taariikh 20.12.1976;

ISAGOO AQAANSADAY: Is Sarkaalkaas hoos ku magacaaban shaqada laga fariisiyo marka laga billaabo 1da Jannaayi 1977;

ISAGOO DHEGEYSTAY: RA'yigii Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha:

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

In Sarkaalka hoos ku magacaaban oo ka tirsanaa Ciidanka Booliska shaqada laga fadhiisyo marka laga billaabo taariikhda hortiis ku qoran, iyadoo la tixgelinayo ogilaanshihii Madaxtooyada J.D.S.:

1. Gaashaanle Maxamed Maxamuud Samantar — 1 Jannaayo 77.

Qodobka 2aad

Sarkaalkaasu wuxuu xaq u yeelan doonaa wixii xaq ah ee uu siiyo sharciga 6 ee 31.12.1969 ee xaqa iyo abaalgudka Ciidamada qalabka Sida.

Qodobka 3aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan geleyaa waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13.1.1977.

Madaxwenaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

Wasiirka Arrimaha Gudaha
*Jaalle S/Gaas Jaamac Maxamed Qaalbi*

**WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY**
**Diiwaanka lambar 1 bogga lambar 184**
**Ku XIgeenka Hantidawraha Guud**
**Yuusuf Cali Nuur**

## BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O   D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Maxamed Saciid Samantar. uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 7.9.76, gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal degmada Hodan Qaabkiisuna yahay Rettangolar addimihiisu yihiin 40x30 kuna fadhiya 1200 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada 21ka Oktoobar.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 182k.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 159k.

Bari waxa ka xiga: Waddo.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddano) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiisyada ee dawladda Hoose Waaxda farsamada dhulka.

Muqdisho, 10.1.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Jnj. Caydaruus Cumaan Keenidiid)*

L. 24



### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O   D H U L

Waxaa lacaddaynayaa in Jaalle Cusmaan Jimcaale Maxamuud uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 24.7.76. gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal degmada Hodan. Qaabkiisuna yahay Rettangolare addimihiisuna yihiin 28x20 kuna fadhiya 560mdh. soohdimihiisuna yihiis sida hoosku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 233k

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.

Bari waxaa ka xiga: Dhul Lam.261k.

Qofkii danaynaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah ee dawladda; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Muqdisho, 10.1.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Jnj. Caydaruus Cumaan Keenidiid)*

L. 25

# WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O   D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Macallim Abukar Aw Xasan uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 29.11.1976 gabal dhul daw-ladeed ah oo ku yaal degmada Wardhigley qaabkiisuna yahay Rettangolar addimihiisu yihiin 30x16 kuna fadhia 420mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: G.L. 1388/58.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: G.L. 376/61.

B a r i waxaa ka xiga: G.L. 1397/58.

Qofkii danaynaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naq-shadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (sod-dan) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga finta Rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiisyada ee Dawladda da Hoose Waaxda Farsamadda Dhulka.

Muqdisho, 10.1.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(Jnj. Cayduruus Cumaan Keenidiid)*





# WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### N A A D O   D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Xasan Maxamuud Khaliif uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 27.9.75. gabal dhul Daw-ladeed ah oo ku yaal degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolar. addimihiisu yihiin 28x20 kuna fadhiya 560 m.c.h. soohdimihiisuna yihiin sidahoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddada 30ka ah.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 79k.

B a r i waxaa ka xiga: dhul lam. 81k.

dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naq-
o aal Waaxda dhismahaiyo dhulka ee Wasaaradda
laga doodi karaa muddo kusiman 30 (sod-
laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga
Rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looga ogeysiiska ee Dawlad-
Hoose Waaxda Farsamada dhulka.

Muqdisho, 10 1 1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(Jnj. Cayduruus Cumaan Keenidiid)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O   D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Aadan Cali Xasan, uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 30.10.76, gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal degmada Boondheere qaabkiisuna yahay Rettangolar, addimihiisu yihiin 26x24 kuna fadhiya mdh. 524 soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Ibraahim uunlaaye.

Koonfur waxa ka xiga: dhul uu leeyahay Maxamed Mahdi.

Galbeed waxaa ka xiga: Guryaha Bankiga.

B a r i waxaa ka xiga: Yuusuf Cegaal.

Qofkii danaynaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah; laguna soo dhejeyi looxa ogeysiisya ee Dawladda hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Muqdisho, 10.1.1977,

*(Jnj. Cayduruus Cumaan Keenidiid)*
Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka





## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O   D H U L

Muuse Faarax Xasan uu ku soo ahayd 18.6.76, gabal dhul Dawladeed kuna fadhiya 560 mdh. soohdim[redacted]hiisuna yihiin yaal degmada Hodan qaabkiisuna yahay Rettangolar, addimi- tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: G.L. 228k.

Galbeed waxaa ka xiga: G.L. Waddo.

B a r i waxaa ka xiga: G.L. 256k.

Muqdishi, 10.1.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Jnj. Cayduruus Cumaan Keenidiid)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O   D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Cabdirisaaq Axmed Jaamac uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayc 15.3.76. gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolar. addimihiisuna yihiin 28x20 kuna fadhiya 560 m.h. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: G.L. 78k.

B a r i waxaa ka xiga: G.L. 80k.

Qofkii oaraynaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga goodi karaa muddo ku siman 30 (soddon maalmood oo laga billaabo maalinta lagu daabaco buugga Faafinta Rasmigaah; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiiska ee Dawladda Hoose Waaxda Fasamada Dhulka.

Muqdisho, 10.1.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Jnj. Cayduruus Cumaan Keenidiid)*

L. 30



## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O   D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Cabdiwali Sheekh Barkhadle
taariikhdiisu ahayd 23.9.74 gabal dhul
degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Ret-
30x20 kuna fadhiya 600 m.h. soohdimi-

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 52k.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 37k.

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 38k.

uga arki karaa
iyo dhulka ee Wasaa-
karaa muddo ku siman
oo maalinta lagu soo daabaco
dhejiyo looxa ogeysiisyada

Muqdisho, 10.1.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Jnj. Cayduruus Cumaan Keenidiid)*

L. 31

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O   D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaallayaasha Colaad Cali Barre iyo Xaliima Caddow Maxamed.

Xaliimo Caddow Maxamed, uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 25.12.1976. gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal degmada Boondheere. qaabkiisuna yahay Afar Gees· addimihiisu yihiin 20x20 kuna fadhiya 400 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: W. Batroolka Ummadda.

Koonfur waxaa ka xiga: Jaalle Calasey Caddow.

Gabeed waxaa ka xiga: Waddada Gen. Daa'uud

B a r i waxaa ka xiga: Jaalle Cabdi Cali.

Qofkii danaynaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamadda Dhulka.

Muqdisho, 10.1.1977,

*(Jnj. Cayduruus Cumaan Keenidiid)*
Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

L. 32



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O   D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Jaamac Cabdi Cali uu ku soo weydiistayarjiga taariikhdiisu ahayd 8.10.60. gobal dhul Dawladeed ah oo ku yaal degmada Hodan qaabkiisuna yahay Rettangolar. addimihiisu yihiin 30x20 kunafadhiya 600 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos tilmaalman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo·

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: G.L. 99k.

B a r i waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqschadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Muqdisho, 10.1.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Jnj. Cayduruus Cumaan Keenidiid)*

L. 33

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Cabdullaahi Maxamed Saedi. uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 8.6.1976. gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolaar. addimihiisu yihiin 30x20 kuna fadhiya 600 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 276k.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 248k.

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul lam. 250k.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah; lagusa soo dhejiyo looxa ogeysiisyada Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Muqdisho, 10.1.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(Inj. Cayduruus Cumaan Keenidiid)*

L. 34



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xuseen Nuur Muuddey uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 22.6.76. gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal degmada Hodan qaabkiisuna yahay Rettangolar addimihiisu yihiin 30x20 kuna fadhiya 600mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 253k.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lam. 279k.

B a r i waxaa ka xiga: dhul lam. 281k.

Qofkii danaynaayas dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga bilaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamada dhulka.

Muqdisho, 10.1.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(Inj. Cayduruus Cumaan Keenidiid)*

L. 35

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Saciid Samantar uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 7.9.76 gabal dhul oowladeed ah oo ku yaal degmada Hodon qaabkiisuna yahay Rettangolar addimihiisu yihiin 40x30 kuna fadhiya 1200mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada 21 Oktoobar.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 182k.

Galbeed waxaa xiga: dhul lam.159k.

B a r i waxaa ka xiga: Wadoo.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa mudoo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga bilaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Muqrisho, 10.1.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Inj. Cayduruus Cumaan Keenidiid)*





## BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

## XEER NIDAAMIYE LAM. 101 EE 26.12.1976,

## UJEEDDO HEERKA SARRIFKA LACAGAHA QALAAD

## GUDDOMIYAHA IYO AGAASIMAHA GUUD

## EE BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKAY ARKEEN: Qodobka 10aad, Xeerka lam. 12 ee 26kii Setember, 1964, laguna beddelay Sharciga Lam. 8 ee 29kii Oktoobar 1964, kuna saaban Xeerka u degsan daadihinta Ganacsiga dibedda ee awood siinaya Bankiga Dhexe ee Soomaaliya inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee looguna beddelan karo lacagteenna.

AYAGOO TIGELINAYA Isbeddelka qiimaha lacagaha qalaad ee saamaynaya ganacsiga dunida, sida joogto ahaan naga soo gaarta Suuqa Sarrifka Caalamiga ah.

MARKII LA GARTAY In la daryeelo ganacsiga iyo danaha kale ee dhaqaalaha waddankeena.

AYAGOO OGSOON In horey loo qaatay go'aan degdeg ah Lam. 221 ee 26.12.1976. sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lam. 27 ee 26kii Nofember, 1968, uu dhigayo.

### WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qaron, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, lagabilaabo 28.12.1976 waxaa go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jahmuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

| Lacagta Qalaad | | Heerka Jigsashada | Heerka Gadidda |
|---|---|---|---|
| | | oo Sh. S0. Ah | oo Sh. S0. Ah |
| US$ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK£ | 1.00 | 10.3680 | 10.5754 |
| DM | 1.00 | 2.6160 | 2.6683 |
| LIT. | 138.72 | 1.0000 | —— |
| LIT. | 135.95 | —— | 1.0000 |
| F.RF.R | 1.00 | 1.2563 | 1.2814 |
| SW.F.R. | 1.00 | 2.5549 | 2.6060 |
| D.J.F.R. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

Muqdisho, 26.12.1976.

CUMAR AXMED CUMAR
GUDDOOMIYAHA

SACIID MAXAMED CALI
AGAASIMAHA GUUD

## BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

HEERKA NIDDAMIYE LAMBAR 102 ee 17.1.1977.

UJEEDDO: HEERKA SARRIFKA LACAGAHA QALAAD GUDDOMIYAHA IYO AGAASIMAHA GUUD EE BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

MARKEY ARKEEN Qodobka 10aad, Xeerka lam. 12 ee 26kii Setembar, 1964, laguna beddelay Sharciga lam. 8 ee 29kii Oktoobar, 1964, kuna saabsan xeerka u degsan Daadihinta ganacsiga dibedda ee awood siinaya BANKIGA DHEXE EE SOOMAALIYA inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee laguna beddelan karo lacagteenna.

IYAGOO TIXGELINAYA: Isbeddelka qiimaha lacagaha qalaar ee saameynaya ganacsiga duniaa sida joogto ahaan naga soo gaarta Suuqa Sarrifka Caalamiga ah.

MARKII LA GARTAY In la daryeelo iyo danaha kale ee dhaqaalaha
MARKII LA GARTAY: In la daryeelo ganacsiga iyo danaha kale ee dhaqaalaha waddankeenna.

AYAGOO OGSOON In horey loo qaatay go'aan degdeg ah lam. 222 ee 17.1.1977, sida Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, Lambar 27 ee 26kii Nofember, 1968, uu dhigayo.

### WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku aaoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata, laga billaabo 19.1.1977, waxaa go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

| Lacagaha qalaad | | oo Sh. So. Ah Heerka Iibsashada | oo Sh. So. Ah Heerka Gadida |
|---|---|---|---|
| US$ | 1.00 | 6.2327 | 6.3573 |
| UK£ | 1.00 | 10.5754 | 10.7869 |
| DM | 1.00 | 2.6160 | 2.6683 |
| LIT. | 138.72 | 1.0000 | —— |
| LIT. | 135.95 | —— | 1.0000 |
| F.R.F.R. | 1.00 | 1.2563 | 1.2814 |
| SW.FR. | 1.00 | 2.5549 | 2.6060 |
| DJ.FR. | 1.00 | 0.03525 | 0.03596 |

SACIID MAXAMED CALI
AGAASIMAHA GUUD

CUMAR AXMED CUMAR
GUDDOOHIYAHA

L. 38



## MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER EE BURCO

GAASHAANLE XASAN MACALLIN DACWOODE

DACWEN

BANGIKA GANACSIIGA UMMADDA LAANTA BURCO

DACWEYSANE

MARKII AAN ARKAY: Arjiga Dacwoodaha Dable Xasan Cabdulle Macallin inuu ka lumay jeeg wareega lam. yahay 101612 lacagtiisuna ahayd 940 (sagaal biqol iyo afartan) Shilin taariikhdiisuna ahayd 28.8.1976, kana lumay taariikhdu markay ahayd 16.11.76,

MARKII ANN ARKAY: Warqadda sumaddeedu thay 01492 T. tahay 25.11.76, oo ka timid Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta Burco oo ay hubiyeen in jeeggaasu jiro,

MARKII ANN HUBIYEY: In Dacwoodaha dooddiisu run tahay, isla markaasna aan arkay Qod. 27 ee Xeerka Lam. yahay 2 soona baxay 9.9.65. Ayaan guddoonshay in Jeegga wareega lam. yahay 101612 la baabi'iyo,

Bankiga Ganacsiguna u celiyo Dable Xasan Cabdulle Macallin lacagta ku qornayd Jeega lam. 10.16.12, 30 casho kaddib marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah; Kharashkana dacwoodaha ha iska bixiyo.

Maanta oo taariikhdu tahay 29.11.1976.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer, Burco.

*(Dr. Cabdiraxmaan X. M. Ereg)*

L. 39